MAXKAMADDA SARE EE GOBOLKA WASHINGTON, DEGMADA KING COUNTY

# Haddii macluumaadkaaga shakhsiyeed la helay iyo/ama lagu helay Jabsahsada Xogta ee ka dhacday Maamulka Guriyeynta Seattle (SHA) bishii Oktoobar 2023, waxa aad u qalantaa inaad lacag bixin ka hesho Heshiiska Dacwo Kooxeedka.

*Maxkamad ayaa oggolaatay Ogeysiiskan, Kani ma aha codsi ka yimid qareen.*

**OGEYSIISKAN WUXUU SAAMAYN KU YEELAN KARAA XAQUUQAHAAGA.**
**FADLAN SI TAXADIR LEH U AKHRI.**

- Waxaa la soo jeediyay heshiis ku aadan dacwad kooxeed oo ka dhan ah Maamulka Guryeynta Seattle ("SHA"ama"Eedaysane") dacwadaas oo la xiriirta weerar internet-ka ah oo dhacay bishii Oktoobar 2023 halkaas oo dambiilayaasha internetka ay suurtagal tahay inay galeen iyo/ama heleen faylal gaar ah oo ay ku jiraan macluumaadka gaarka ah ee shakhsiyaadka ("Jabsashada Xogta"). SHA waxay diiday dhammaan sheegashooyinka/dacwadaha lagu soo oogay waxayna diiday dhammaan eedeymaha dembi-gelista ama masuuliyadda arrinkaas. Heshiiska maaha qirashada khalad samayn ama calaamad muujinaysa in Eedaysanaha uu ku xad-gudbay wax sharci ah, laakiin waa xallinta sheegashooyinka la isku haysto.
- Heshiiska wuxuu bixinayaa abuuritaanka Sanduuqa Lacagta Heshiiska oo gaaraysa $486,000.00 taas oo loogu talagalay bixinta Gunnooyinka Heshiiska (eeg su'aalaha 7-9). Intaa waxaa dheer, Sanduuqa Lacagta Heshiiska ayaa lagu bixin doonaa kharashyada Maamulka Ogeysiisyada iyo Dacwadaha, Kharashaadka Qareenada iyo Kharashyada ay bixisay Maxkamadda, iyo khidmadaha adeegga ee wakiillada dacwoodayaasha ee ay Maxkamaddu amartay in la siiyo.
- Xuquuqahaaga sharciyeed ayaa saamayn soo gaaraysa iyada oo aan loo eegin haddii aad tallaabo qaato iyo haddii aadan qaadinba. Si taxadar leh u akhri ogeysiiskan. Si aad u hesho faahfaahin dhammaystiran, booqo www.SeattleHADataIncident.com ama wac 1-844-405-6502.

| XUQUUQAHAAGA IYO XULASHOOYINKAAGA SHARCIYEED EE HESHIISKAN | |
|---|---|
| GUDBI FOOMKA SHEEGASHADA UGU DAMBAYN: NOFEEMBAR 19, 2025 | Sida kaliya ee aad ku heli karto wax Gunnooyinka Heshiiska. |
| ISKAGA BAX KOOXDA ADIGOO DOORANAYA INAAD KA BAXDO: 2025 | Ha qaadan wax gunno ah. Ilaasho xaquuqda aad u leedahay inaad gudbiso dacwo adiga kuu gaar ah oo ka dhan ah SHA adigoo ku dacwaynaya isla sheegashooyinka lagu xalliyey Heshiiskan. |
| DIID HESHIISKA UGU DAMBAYN: OKTOOBAR 20, 2025 | Maxkamada u sheeg sababaha aadan u aaminsanayn in Heshiiska la ansixiyo. Waxaad sidoo kale codsan kartaa inaad la hadasho maxkamada xilliga dhageysiga **Diseembar 5, 2025,** oo aad kala hadasho cadaalada Heshiiska, adiga oo haysta ama aadan haysan qareenka. |
| WAXBA HA SAMAYN | Ha qaadan wax gunno ah oo waxaa kugu waajibaya shuruudaha Heshiiska. |

- Xuquuqahaan iyo xulashooyinkan - iyo wakhtiyada kama dambaysta ah ay tahay in la fuliyo - ayaa lagu sharaxay Ogeysiiskan.
- Maxkamadda gacanta ku haysa kiiskan wali waa inay go'aan ka gaartaa inay ansixiso Heshiiska iyo in kale. Gunnooyinka waa la qaybin doonaa haddii ay Maxkamaddu ansixiso Heshiiska iyo ka dib markii la xalliyo wixii racfaan ah.

**Ma Qabtaa Su'aalo? Booqo www.SeattleHADataIncident.com ama wac khadka bilaashka ah 1-844-405-6502.**

## Waxa Ogaysiiskan uu ka Kooban Yahay


Macluumaadka Aasaasiga ah ........................................ bogga 3

1. **Maxaan u Helay Ogeysiiskan?**
2. **Maxay dacwadan ku saabsan tahay?**
3. **Waa maxay dacwad wadareed/kooxeed?**
4. **Waa maxay sababta loo sameeyay Heshiis?**

Yaa ku jira Heshiiska? ........................................ bogga 3-4

5. **Sideen ku ogaan karaa in aan qayb ka ahay Heshiiska?**
6. **Ma jiraan ka-dhaafitaano ku aadan ka qayb noqoshada?**

Gunnooyinka Heshiiska—Waxa aad Helayso Haddii Aad U Qalanto ........................................ bogga 4-5

7. **Muxuu Heshiiskan bixinayaa?**
8. **Maxaan ka heli karaa Heshiiska?**
9. **Maxaan ka tanaasulayaa haddii aan ku sii jiro Kooxda Dacwadda?**

Sida Loo Helo Gunnooyinka—Gudbinta Foomka Dacwadda ........................................ bogga 5-6

10. **Sideen ku heli karaa lacag-bixin?**
11. **Intee ayay noqon doontaa lacagta aan helayo?**
12. **Goorma ayaan heli doonaa lacag-bixintayda?**

Qareenada Ku Matalaya ........................................ bogga 6

13. **Qareen miyaan ku leeyahay kiiskan?**
14. **Miyaan raadsadaa qareen ii gaar ah?**
15. **Sidee loo bixin doonaa khidmadaha qareennada?**

Iskaga Bixida Heshiiska ........................................ bogga 6-7

16. **Sideen uga baxaa Heshiiska?**
17. **Haddii aan xubin ka ahay Kooxda Heshiis Ka Gaarista Dacwadda oo aanan dooran inaan Iskaga Baxo, miyaan eedaysanaha ku dacwayn karaa isla arrintan goor dambe?**
18. **Maxaa dhacaya haddii doorto inaan Iskaga Baxo?**

Ka faalloodida ama Diidida Heshiiska ........................................ bogga 7-8

19. **Sideen ugu sheegaa Maxkamadda in aanan jeclayn Heshiiska?**
20. **Waa maxay farqiga u dhexeeya diidista iyo inaan aniga ka dhex baxo/iska reebo Heshiiska?**

Dhegeysiga Caddaaladda ah ee Kama Dambaysta ah ee Maxkamadda ........................................ bogga 8-9

21. **Goorma iyo halkee ayay Maxkamaddu go'aan kaga gaari doontaa in la ansixinayo Heshiiska iyo in kale?**
22. **Miyaan ku qasbanahay in aan imaado Dhageysiga Cadaaladda ah ee Kama Dambaysta ah?**
23. **Ma samayn karaa hadal jeedin xilliga Dhegeysiga?**

HaddiiAANAN Waxba Samayn ........................................ bogga 9

24. **Maxaa dhacaya haddii aanan waxba samayn?**

Helitaanka Macluumaad Dheeraad ah ........................................ bogga 9

25. **Ma jiraan faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Heshiiska oo la heli karo?**
26. **Sideen ku helaa macluumaad dheeraad ah?**

## Macluumaadka Aasaasiga ah

### Waa maxay sababta aan u helay Ogeysiiska?

Waxaad heshay ogeysiiska kaarka boostada ama iimaylka sababtoo ah waxaa laguu aqoonsaday inaad tahay qof xogtiisa la helay iyo/ama la jabsaday intii lagu jiray Jabsashada Xogta. Shakhsiyaadka qaarkood ee ku andacoonaya in xogtooda shakhsiyeed la helay iyo/ama la jabsaday intii lagu jiray Jabsashada Xogta ayaa waxay dacwad ka keeneen SHA. SHA way diiday eedaymaha waxayna beenisay in masuuliyaddaas ay iyada korka ka fuuli doonto haddii kiiska uu u sii gudbo dhagaysi maxkamadeed. Dhinacyada hadda waxay gaareen Heshiis la soo jeediyay oo lagu xallinayo dacwada.

Maxkamaddu waxay amartay in Ogeysiis la bixiyo sababtoo ah waxaad xaq u leedahay inaad wax ka ogaato heshiiska la soo jeediyay oo lagu xallinayo dacwad wadareedkan iyo inaad wax ka ogaato dhammaan xulashooyinka aad haysato ka hor inta aysan Maxkamaddu go'aan ka gaarin inay bixiso ansixinta kama dambaysta ah ee Heshiiska. Haddii ay Maxkamadda ay ansixiso Heshiiska, iyo ka dib marka wixii diidmooyin ama racfaano ah, haddii ay jiraan, la xalliyo, Maamulaha Heshiiska ee ay magacawday Maxkamadda ayaa wuxuu Gunnooyinka Heshiiska u qaybin doonaa Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee soo gudbiyay Dacwad Ansax ah iyo sheegashooyinka sharciyeed ee la sugayo ee ka dhanka ah SHA ayaa laga sii dayn doonaa lana baabi'in doonaa.

Ogeysiiskani wuxuu sharxayaa dacwadda, Heshiiska, xuquuqahaaga sharciyeed, gunnooyinka la heli karo, cidda u qalanta, iyo sida loo helo. Kiisku waa *Lewis et al. v. Seattle Housing Authority*, lambarka Kiiska waa 24-2-16171-6 BADDA, oo hadda ka socda Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington, Degmada King County.

### 2. Maxay dacwadan ku saabsan tahay?

Dacwoodayaasha waxay sheeganayaan in SHA ay mas'uul ka tahay Jabsashada Xogta waxayna caddeeyeen dacwado sharciyeed oo badan oo ka dhan ah SHA. SHA waxay diidday mid kasta oo ka mid ah iyo dhammaan sheegashooyinka/dacwadaha iyo doodaha lagu eedeeyay ee ku jira Falka/Dacwadda.

### 3. Waa maxay dacwad wadareed/kooxeed?

Dacwad wadareedda, hal ama in ka badan oo qof oo loo yaqaano "Wakiilada Dacwadda" ayaa dacwad gudbiya iyaga oo ku hadlaya magaca dadkaas iyo dadka kale ee ay u maleynayaan in ay sheegashooyin noocaas ah qabaan. Kooxdan oo kale ah waxaa loo yaqaanaa "class", dadka ku jira kooxdana waxaa loo yaqaanaa "Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka" ama "Kooxda Dacwad Wadareedka." Hal Maxkamad ayaa xallisa arrimaha dhammaan Xubnaha Kooxda, marka laga reebo kuwa iskaga baxa Kooxda Dacwad Wadareedka. Dadka halkan dacwada ku gudbiyay—Lakisha Lewis and Czarina Slape—waxaa loo yaqaanaa dacwoodayaasha. Cidda ay dacweeyeen—SHA—waxaa loo yaqaanaa Eedeysanaha.

### 4. Waa maxay sababta loo sameeyay Heshiis?

Maxkamaddu ma aysan gaarin go'aan u hiilinaya Dacwoodayaasha ama Eedaysanaha. Taas beddelkeeda, labada dhinacba waxay ku heshiiyeen in la sameeyo Heshiis/Is-afgarad. Habkaas, waxay kaga fogaanayaan kharashaadka iyo khatarta ku lugta leh isla tiigsiga maxkamadda, iyo Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedkana waxay heli karaan gunnooyin ama magdhow. Wakiilada Kooxda Dacwad Wadareedka iyo La-taliyaha Kooxda Dacwad Wadareedka waxay aaminsan yihii in Heshiiska/Is-afgaradka ay ku jirto danta ugu wanaagsan Kooxda Dacwad Wadareedka.

## Yaa ku jira Heshiiska?

### 5. Sideen ku ogaan karaa in aan qayb ka ahay Heshiiska?

Kooxda Dacwad Wadareedka waxaa lagu qeexaa: "Dhammaan dadka deggan Maraykanka oo xogtooda shakhsi ahaaneed la helay iyo/ama la jabsaday xilligii Jabsashada Xogta." Waxa jira ku dhawaad 72,000 oo Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ah.

## 6. Ma jiraan ka-dhaafitaano ku aadan ka qayb noqoshada Heshiiska?

Haa. Kooxda Dacwad Wadareedka ayaa si gaar ah uga reeban: (1) garsoorayaasha hogaaminaya Dacwaddan, iyo xubnaha qoysaskooda tooska ah; (2) Eedaysanaha, laamaha shirkadda, shirkadaha ay shirkadda ka soo faracantay, kuwa maamulka shirkadda qaban doona, kuwa maamulka shirkadda soo haayay, iyo cid kasta oo Eedaysanaha ama shirkadaha ay shirkadda ka soo faracantay ay ku leeyihiin dano koontaroolaya iyo shaqaalaha iyo agaasimayaashii hore ama hadda ee shirkadda; iyo (3) Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee soo gudbiyay codsi ansax ah oo ah laga saaro kooxda ka hor wakhtiga kama dambaysta ah ee Doorashada Ka Bixitaanka Kooxda.

# GUNNOOYINKA HESHIISKA—WAXA AAD HELAYSO HADDII AAD U QALANTO

## 7. Muxuu Heshiiskan bixinayaa?

Sida ku cad Heshiiska, SHA waxay samayn doontaa sanduuqa lacagta heshiiska aan dib loo ceshan karin oo cadadkeedu dhan yahay $486,000.00. Lacagahan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu bixiyo dhammaan sheegashooyinka ansax ah ee ay soo gudbiyeen Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka, kharashaadka ogeysiisyada iyo maamulka, khidmadaha adeegga, iyo kharashyada qareennada. Marnaba SHA ma bixin doonto wax ka badan $486,000.00.

## 8. Maxaan ka heli karaa Heshiiska?

Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ayaa laga yaabaa inay gudbiyaan sheegasho ku aadan mid ka mid ah ama in ka badan oo ka mid ah Gunnooyinka Kaashka ah ee soo socda.

- **Magdhowga Khasaarooyinka Lacagta Jeebka Ka Baxay:** Dhammaan Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka waxay soo gudbisan karaan sheegasho ku aadan Khasaarooyinka Lacagta Jeebka Ka Baxday ee la dukumeenti gareeyay, oo gaaraya ilaa ugu badnaan Shan kun oo Doolar iyo Eber Senti ($5,000.00). Khasaarooyinka Lacagta Jeebka Ka Baxday waa kharashyo ama kharashaad aan magdhow laga bixinin oo ay galeen Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka kuwaas oo si cadaalad ah loogu xiriirin karo Jabsashada Xogta oo ay ku jiraan, iyada oo aan intaas ku xaddidnayn, waxyaabahan soo socda: (i) khasaarooyinka aan magdhowga laga bixin ee la xiriira khiyaanada ama xatooyada aqoonsiga; (ii) khidmadaha xirfadlayda la siiyo oo ay ku jiraan khidmadaha qareennada, khidmadaha xisaabiyeyaasha, iyo khidmadaha adeegyada dayactirka kiridhitka; (iii) kharashyada la xiriira xayiridda ama xayiraad ka qaadista kiridhitka ee hay'ad kasta oo ka warbixisa kiridhitka wixii ka dambeeya Agoosto 9, 2023; (iv) kharashyada kormeerida kiridhitka ee la galay markay ahayd ama ka dib Agoosto 9, 2023 ilaa taariikhda la soo gudbiyay sheegashada; iyo (v) kharashyada kala duwan sida kharashaadka nootaayada, fakiska, boostada, koobiyeynta, masaafada, iyo kharashka wicitaanada taleefanka ee fogfog. Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee ka qaybqaadanaya dacwadda ee galay khasaarooyinka Lacagta Jeebka Ka Baxday waa Maamulaha Heshiiska siiyaan macluumaadka looga baahan yahay si loo qiimeeyo sheegashada, oo ay ku jiraan: (1) Magaca Xubinta Kooxda Dacwad Wadareedka ee ka qaybqaadanaya dacwadda iyo cinwaanka hadda; (2) dukumeenti taageeraya sheegashadooda; (3) sharraxaad kooban oo ku saabsan dukumeentiga qeexaya nooca khasaaraha, haddii nooca khasaaraha uusan ka muuqan dukumentiga; iyo (4) bayaan caddaynaya in Xubinta Kooxda Dacwad Wadareedka ee ka qaybqaadanaya dacwadda aan laga magdhowin khasaaraha soo gaaray iyadoo la isticmaalayo ilo kale. Dukumentiyadaas waxaa ka mid noqon kara rasiidyada ama dukumeentiyada kale ee uusan soo "diyaarinin" dacwoodaha, dukumentigaas oo diiwaangelinaya kharashaadka la galay. Dukumeentiyada uu "dacwoodaha diyaariyey" sida rasiidyada gacanta lagu qoray ayaa, laftooda, ah kuwo aan ku filnayn in lagu helo magdhow, laakiin waxaa loo tixgelin karaa inay wax kala caddayn kraan ama taageero u noqon karaan dukumeentiyada kale ee la soo gudbiyay.

- **Magdhowga Wakhtiga La Xaqiijiyay:** Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee ka qaybqaadanaya dacwadda waxay soo gudbin karaan sheegashooyin ku aadan magdhowga Wakhtiga La Xaqiijiyay ee gaaraya ilaa afar (4) saacadood oo wakhti ah oo lagu magdhowayo qiimaha Shan iyo Labaatan Doolar iyo Eber Senti ($25.00) saacadii. Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee ka qaybqaadanaya dacwadda waxay heli karaan magdhowga Wakhtiga La Xaqiijiyay iyagoo bixinaya sharaxaad kooban oo ku saabsan ficilada la qaaday si looga jawaab

celiyo Jabsashada Xogta iyo wakhtiga lagu bixiyay tallaabo kasta. Sheegashooyinka Wakhtiga La Xaqiijiyay waxay ku xaddidan yihiin Boqol Doolar iyo Eber Senti ($100.00) qofkiiba.

- **Lacag-bixinta Kaashka ah ee Beddelka ah:** Bedelkii ay ka gudbin lahaayeen Sheegasho ku aadan Magdhowga Khasaarooyinka Lacagta Jeebka Ka Baxday ama Magdhowga Wakhtiga La Xaqiijiyay, Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee ka qaybqaadanaya dacwadda waxay soo gudbin karaan Sheegashada Lacag-bixinta Kaashka ee Beddelka ah. Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee ka qaybqaadanaya dacwadda loogama baahna inay soo gudbiyaan wax dukumeenti ah ama macluumaad dheeraad ah oo taageeraya sheegashadooda ku aadan Lacag-bixinta Kaashka ee Beddelka ah. Si kastaba ha ahaatee, Foomka Dacwada waa in uu si cad u muujiyaa in Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee ka qaybqaadanaya dacwadda ay dooranayaan inay dalbadaan Lacag-bixinta Kaashka ah ee Beddelka ah bedelkii ay ka dooran lahaayeen gunnooyinka kale ee laga heli karo Heshiiskan. Caddadka abaal-marinta lacagta kaashka ah ayaa la kordhin doonaa ama la dhimi doonaa iyadoo la isticmaalayo qiimaha *pro rata*, iyadoo ku xiran tirada sheegashooyinka ansaxa ah ee la xareeyay iyo cadadka lacagaha la heli karo ee lacag bixinadan.

### 9. Maxaan ka tanaasulayaa haddii aan ku sii jiro Kooxda Dacwad Wadareedka?

Haddii aad Xubin ka tahay Kooxda Dacwad Wadareedka oo aadan iskaga bixin Heshiiska, waxaad ka tanaasuli doontaa xaqa aad u leedahay inaad dacwayso, sii wado inaad dacwayso, ama aad qayb ka noqoto dacwad kasta oo kale oo ka dhan ah SHA ama qollooyinka kale ee la sii daayay ee la xiriira sheegashada lagu xalliyay Heshiiskan. Heshiiska wuxuu qeexayaa sheegashooyinka sharciga ah ee aad ka tanaasulayso haddii aad ku sii jirto Kooxda Dacwad Wadareedka. Heshiiska oo dhamaystiran waxa laga eegi karaa www.SeattleHADataIncident.com.

## Sida loo helo Gunnooyinka— Gudbinta Sheegasho/Dacwad

### 10. Sideen ku heli karaa lacag-bixin?

Si aad wax gunno ah uga hesho Heshiiskan, waa inaad buuxisaa oo aad soo gudbisaa Foomka Sheegashada. Foomamka Sheegashada waxaa lagu soo gudbin karaa khadka www.SeattleHADataIncident.com ama waxaa lagu soo diri karaa cinwaanka ku yaala Foomka Sheegashada. Xaqiiji inaad si taxadar leh u akhriso tilmaamaha Foomka Sheegashada, ku qor dhammaan macluumaadka loo baahan yahay, oo ku dar saxeexaaga.

Maamulaha Heshiiska ayaa dib u eegis ku samayn doona sheegashadaada si uu u go'aamiyo ansaxnimadda sheegashada iyo cadadka lacag bixintaada.

Kani waa dacwad wadareed xiran. Gunnooyinka waxaa heli kara oo keliya Xubnaha Kooxda Dacwad Wadareedka ee leh aqoonsiga gaarka ah. Dhammaan sheegashooyinka ay soo gudbiyaan Xubnaha aan ku jirin Kooxda Dacwad Wadareedka, ama shakhsiyaadka aan haysan aqoonsiga gaarka ah, waa la diidi doonaa. Haddii aad aaminsantahay in aad Xubin ka tahay Kooxda Dacwad Wadareedka balse aadan haysan aqoonsiga gaarka ah, waxaad Maamulaha Heshiiska ka wici kartaa 1-844-405-6502 si aad u xaqiijiso in aad Xubin ka tahay Kooxda Dacwad Wadareedka oo aadna u hesho aqoonsigaga gaarka ah.

### 11. Intee ayay noqon doontaa lacagta aan helayo?

Caddadka lacagta lagu siin doono waxay ku xirnaan doontaa caddadka la ansixiyay ee sheegashadaada iyo wadarta qiimaha dhammaan sheegashooyinka la ansixiyay. Maamulaha Heshiiska ayaa go'aamin doona in macluumaadka lagu bixiyay Foomka Sheegashada uu yahay mid dhameystiran oo ansax ah. Maamulaha Heshiiska ayaa laga yaabaa inuu macluumaad dheeraad ah uga baahdo cid kasta oo wax sheeganaysa. Haddii Maamulaha Heshiiska uu kaaga baahdo macluumaad dheeraad ah oo aadana ku bixinin wakhti ku habboon, waxaa laga yaabaa in sheegashadaada aan lacagteeda la bixin iyadoo go'aankaas uu iska leeyahay Maamulaha Heshiiska.

### 12. Goorma ayaan heli doonaa lacag-bixintayda?

Maxkamaddu waxay Dhegeysiga Caddaaladda ah ee Kama Dambaysta ah qaban doontaa **9:00 A.M. PT** taariikhdu markay tahay **Jimcaha, Diseembar 5, 2025**, si loo go'aamiyo in la ansixiyo Heshiiska iyo in kale. Lacag-bixinada ayaa la samayn doonaa ka dib marka la ansixiyo Heshiiska oo laga dhigo mid kama dambays ah (taas oo macnaheedu yahay in aanu jiri doonin wax rafcaan ah laga qaadan doono amarka lagu ansixiyay Heshiiska). Wararka cusub ee ku saabsan Heshiiska waxaa la soo gelin doonaa Websaydka Heshiiska, www.SeattleHADataIncident.com. Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan wakhtiga lacag bixinta, waxaad la xiriiri kartaa Maamulaha Heshiiska adigoo iimayl uga diraya info@SeattleHADataIncident.com.

## QAREENADA KU MATALAYA

### 13. Qareen miyaan ku leeyahay kiiskan?

Haa. Shirkadda sharciga ee Tousley Brain Stephens PLLC ayaa waxay matalaysaa Kooxda Dacwad Wadareedka. Waxaa loo yaqaanaa La-taliyaha Kooxda Dacwad Wadareedka. Wax lacag ah lagaagama qaadi doono adeegyadooda.

### 14. Miyaan raadsadaa qareen ii gaar ah?

Haddii aad rabto qareen adiga kuu gaar ah, waxaad qabsan kartaa mid, laakiin adiga ayaa ka mas'uul noqonaya lacag kasta oo lagu bixinayo adeegyada qareenka. Tusaale ahaan, waxaad codsan kartaa qareenkaaga inuu yimaado oo uu kugu matalo maxkamadda haddii aad rabto qof aan ahayn La-taliyaha Kooxda Dacwad Wadareedka inuu kuu hadlo. Waxaad sidoo kale ka soo muuqan kartaa maxkamadda qareen la'aan.

### 15. Sidee loo bixin doonaa khidmadaha qareennada?

Qareenada matalaya Kooxda Dacwad Wadareedka ayaan wali helin wax lacag ah oo ku aadan adeegyadooda sharciga ah ama wax magdhow ah oo laga siiyay kharashaadka ama kharashyada ka baxay jeebkooda. La-taliyaha Kooxda Dacwad Wadareedka ayaa qorsheynaya inay Maxkamadda waydiiyaan in kharashaadka qareenka laga siiyo Sanduuqa Lacagta Heshiiska, kharashaadkaas oo aan ka badnayn boqolkiiba soddon (30%) ee Sanduuqa Lacagta Heshiiska ama $145,800. La-taliyaha Kooxda Dacwad Wadareedka ayaa sidoo kale raadsan doonaan in la siiyo khidmadaha adeegga ee caddad ahaan gaaraya afar kun oo doollar oo aan senti la socon ($4,000.00) oo la siinayo mid kasta oo ka mid ah labada (2) Wakiilo ee Dacwoodayaasha.

Maxkamaddu waxay go'aamin doontaa in la ansixiyo caddadka khidmadaha iyo kharashyada ay codsadaan La-taliyaha Kooxda Dacwad Wadareedka iyo soo jeedinta Khidmadaha Adeegga ee Wakiilada Kooxda Dacwad Wadareedka. La-taliyaha Kooxda Dacwad Wadareedka ayaa gudbin doonaan codsiga khidmadaha, kharashyada, iyo Abaalmarinta Adeegga ugu dambayn **Oktoobar 6, 2025**. Codsiga waxaa laga heli karaa Websaydka Heshiiska, www.SeattleHADataIncident.com, ama waxaad codsan kartaa koobi adiga oo la xiriiraya Maamulka Heshiiska.

## ISKAGA BIXIDA HESHIISKA

### 16. Sideen uga baxaa Heshiiska?

Haddii aad Xubin ka tahay Kooxda Dacwad Wadareedka oo aadan wax gunnooyin ah uga baahnayn Heshiiskan, oo aad rabto inaad ilaashato xaqa aad u leedahay inaad Maamulka Guriyeynta Seattle goonigaaga ugu dacwaysato arrimaha ku saabsan Dacwadan, markaas waa inaad qaaddaa tillaabooyin aad uga baxayso Kooxda Dacwad Wadareedka. Tani waxaa loo yaqaanaa iskaga bixintaanka–ama "doorashada ka bixitaanka" –Kooxda Dacwad Wadareedka.

Waxaad ka bixi kartaa Kooxda Dacwad Wadareedka ugu dambayn **Oktoobar 20, 2025**. Si aad uga baxdo, waa inaad warqad ama kaarka boostada ku soo dirtaa Boostada U.S. adigoo u daraya cinwaanka hoose. Waa inaad warqadaada ama kaarka boostada ku soo qortaa:

- Magaca Dacwada, *Lewis et al. v. Seattle Housing Authority*, Lambarka Kiis 24-2-16171-6-SEA (Maxkamadda Sare ee Gobolka Washington, Degmada King County), ama wax si la mid ah ugu dhow magaca kiiska;
- Magacaaga oo buuxa, cinwaankaaga hadda, iyo saxeexaaga shakhsi ahaaneed;
- Erayada "Codsiga Ka Bixida" oo aad ku qorayso dusha sare ee dukumeentiga ama bayaan cad oo sheegaya inaad rabto inaad ka baxdo Heshiiska.

Waa inaad soo dirtaa codsigaaga ka bixida Heshiiska, ama waa in warqadda boostada ku calaamadaysan tahay taariikh ugu dambayn ah **Oktoobar 20, 2025,** waxaana loo dirayaa:

SHA Data Settlement
P. O. Box 1068
Baton Rouge, LA 70821

Haddii aad ku guul dareysato inaad ku soo darto macluumaadka loo baahan yahay, codsigaaga waxaa loo aqoonsan doonaa inuu yahay mid aan ansax ahayn oo waxaad ahaan doontaa Xubin ka tirsan Kooxda Dacwad Wadareedka waxaana ku qaban doona xeerarka Heshiiska, oo ay ku jiraan dhammaan wixii siidayn ah.

### 17. Haddii aan xubin ka ahay Kooxda Heshiis Ka Gaarista Dacwadda oo aanan dooran inaan Iskaga Baxo, miyaan eedaysanaha ku dacwayn karaa isla arrintan goor dambe?

Maya. Marka laga reebo haddii aad iskaga baxdo Kooxda Heshiiska, waxaad ka tanaasushay xuquuq kasta oo aad u lahayd inaad Eedaysanaha ku dacwayso eedaymaha lagu xalliyay Heshiiskan.

### 18. Maxaa dhacaya haddii doorto inaan Iskaga Baxo?

Haddii aad iskaga baxdo Heshiiska, ma heli doontid wax xuquuq ah ka xubin ahaan ee Kooxda Dacwad Wadareedka. Ma heli doontid lacag-bixin ama gunnooyin maadaama aadan qayb ka ahayn Kooxda Dacwad Wadareedka. Kuma qaban doonaan xeerarka Heshiiska, wixii siidayn ah, ama wixii amaro kale ama xukuno ah oo la xiriira kiiskan. Waxaad sii haysan doontaa xaqa u leedahay, haddii uu jiro, si aad ugu dacweyso dacwadaha lagu soo sheegay dacwadda adigoo iska bixinaya wixii kharashaad ah.

Intaa waxaa dheer, haddii aad iskaga baxdo Heshiiska, ma diidi kartid Heshiiskan sababtoo ah Heshiiska kuma saameynayo. Haddii aad diido Heshiiska oo aad codsato in aad iskaga baxdo, diidmadaada waa la burin doonaa waxaana laguu aqoonsan doonaa in aad iskaga baxday Heshiiska.

## FAALLO KA BIXINTA AMA DIIDITAANKA HESHIISKA

### 19. Sideen ugu sheegaa Maxkamadda in aanan jeclayn Heshiiska?

Haddii aad tahay Xubin ka tirsan Kooxda Dacwad Wadareedka oo aadana iskaga bixin Heshiiska, waxaad diidi kartaa Heshiiska haddii aadan jeclayn ama aadan ku raacsanayn Heshiiska ama qayb ka mid ah. Waxaad Maxkamadda u sheegi kartaa sababaha aad u malaynayso in Maxkamaddu ay tahay in aanay ansixin Heshiiska. Maxkamaddu waxay tixgelin doontaa ra'yigaaga ka hor inta aanay go'aan gaarin.

**Diidmooyinka waa inay ku qornaadaan (i) magacyada dacwadaha; (ii) Magaca buuxa, cinwaanka boostada ee hadda, lambarka taleefanka, iyo cinwaanka iimaylka ee Xubinta Kooxda Heshiis Ka Gaarista Dacwadda; (iii) bayaan qoraal ah oo ku saabsan sababaha gaarka ah oo loo samaynayo diidmada, iyo sidoo kale aasaasyada sharciga ah iyo dukumeentiyada taageeraya diidmada; (iv) bayaan qoraal ah oo ku saabsan in diidmada ay khusayso oo keliya qofka samaynaya diidmada,**

**<u>qayb gaar ah oo ku saabsan kooxda dacwadda, ama dhammaan xubnaha kooxda dacwadda; (v) aqoonsiga mid kasta iyo dhammaan qareennada matalaya qofka samaynaya diidmada; (vi) bayaan ku saabsan haddii Xubinta Kooxda Heshiis Ka Gaarista Dacwadda (ama qareenkiisa/qareenkeeda) ay doonayso inay ka soo muuqato Dhegeysiga Ansixinta ee Kama Dambaysta ah; iyo (vii) Saxeexa Xubinta Kooxda Heshiis Ka Gaarista Dacwadda.</u>**

Si loo ilaaliyo wakhtiga ku habboon, ogaysiiska qoraalka ah ee diidmada ee ku qoran foomka ku habboon waa in lagu soo diraa taariikhda boostada ugu dambayn **Oktoobar 20, 2025**, waana in loo diraa Kooxda Heshiiska iyadoo la isticmaalayo cinwaanka hoose.

SHA Data Settlement
P. O. Box 1068
Baton Rouge, LA 70821

Xubin kasta oo ka tirsan Kooxda Heshiis Ka Gaarista Dacwadda oo ku guuldareysta in uu u hoggaansamo shuruudaha diidmada waa in uu ka tanaasulaa xaquuq kasta iyo dhammaan xuquuqaha isaga uu leeyahay oo u oggolaanaya inuu si gooni ah banaanka ula soo istaago diiditaanka Heshiiska waxaana lagu xirayaa dhammaan shuruudaha Heshiiska iyo dhammaan dacwadaha, amarada iyo xukunada laga gaaray Dacwadda. Habka gaarka ah ee lagu wajahayo caqabad kasta oo ku aadan Heshiiska waa in loo maraa qodobbada halkan lagu sheegay.

### 20. Waa maxay farqiga u dhexeeya diidista iyo inaan aniga ka dhex baxo/iska reebo Heshiiska?

Diidmada waa u sheegidda Maxkamadda inaadan jeclayn wax ku saabsan Heshiiska. Waxaad diidi kartaa Heshiiska kaliya haddii aad Xubin ka tahay Kooxda Heshiis Ka Gaarista Dacwadda isla markaana aadan ka bixin gelitaanka Heshiiska. Inaad iskaga dhex baxdo waxaa loola jeedaa inaad u sheegto Maxkamadda inaadan rabin inaad ka mid noqoto Kooxda marka laga hadlayo Heshiiskan. Haddii aad iskaga dhex baxdo/iska saarto Heshiiska, ma haysatid sal/aasaas aad ku diido ama aad ku gudbiso Foomka Dacwadda sababtoo ah Heshiiska kuma saameynayo adiga.

## <u>DHEGEYSIGA CADDAALADDA AH EE KAMA DAMBAYSTA AH EE MAXKAMADDA</u>

### 21. Goorma iyo halkee ayay Maxkamaddu go'aan kaga gaari doontaa in la ansixinayo Heshiiska

Maxkamaddu waxay Dhegeysiga Caddaaladda ah ee Kama Dambaysta ah qaban doontaa **9:00 A.M. PT** maalinta **Jimcaha, Diseembar 5, 2025**, waxaana lagu qaban doonaa Maxkamadda Sare ee King County, oo ku taala 516 3rd Ave, Room C-203, Seattle, WA 98104. Xilliga dhegeysiga, Maxkamaddu waxay tixgelin doontaa in Heshiiska la soo jeediyay uu yahay mid cadaalad ah, macquul ah, oo ku filan arrinta iyo in kale. Maxkamaddu waxay sidoo kale tixgelin kartaa codsiga la-taliyaha Kooxda si loo bixiyo khidmadaha qareennada, kharashyada, iyo kharashaadka baxay; iyo in la ansixiyo Abaalmarinta Adeegga ee Wakiilada Kooxda. Haddii ay jiraan wax diidmooyin ah, Maxkamadda way tixgelin doontaa. Maxkamaddu waxay dooran kartaa inay dhageysato dadka codsaday inay ka hadlaan dhegeysiga. Xilliga dhegeysiga ama ka dib dhagaysiga, Maxkamaddu waxay go'aan ka gaari doontaa inay ansixinayso Heshiiska iyo in kale. Ma jiro waqti kama-dambays ah oo ay tahay in Maxkamaddu ay go'aan ku gaarto.

### 22. Miyaan ku qasbanahay in aan imaado Dhageysiga Cadaaladda ah ee Kama Dambaysta ah?

Maya. La-taliyaha Kooxda ayaa ka jawaabi doona su'aalo kasta oo ay Maxkamaddu qabto. Si kastaba ha ahaatee, waxaa lagugu soo dhawaynayaa inaad timaado Dhagaysiga Caddaaladda ah ee Kama Dambaysta ah adigoo iska bixinaya kharashkaaga. Haddii aad soo gudbiso diidmo, khasab ma ahan inaad timaado Maxkamadda si aad uga hadasho diidmada. Waxaad sidoo kale qabsan kartaa qareen adiga kuu gaar ah si aad uga xaadirto, adigoo iska bixinaya kharashkaaga, laakiin qasab kuguma ahan inaad sidaas samayso.

## 23. Ma samayn karaa hadal jeedin xilliga Dhegeysiga?

Waxaad maxkamada waydiisan kartaa ogolaansho si aad uga hadasho Dhageysiga Cadaalada ah ee Kama Dambaysta ah. Si aad sidaas u samayso, waa inaad raacdaa tilmaamaha lagu bixiyay Su'aasha 19 ee kor ku xusan. Kama dhex hadli kartid dhegeysiga haddii aad iska saartay Heshiiska.

# HADDII AADAN WAXBA SAMAYN

## 24. Maxaa dhacaya haddii aanan waxba samayn?

Haddii aadan waxba samayn, ma heli doontid ama xaq uma yeelan doontid inaad lacag ka hesho Heshiiskan. Haddii ay maxkamaddu ansixiso Heshiiska, oo aadan waxba samayn, waxaad ku qasbanaan doontaa inaad u hogaansanto shuruucda Heshiiska. Tani waxaa loola jeedaa inaadan awoodi doonin inaad bilowdo dacwad, inaad sii wado dacwad, ama inaad qayb ka noqoto dacwad kasta oo ka dhan ah Maamulka Guriyeynta Seattle ama Dadka Laga Sii Daayay arrimaha ku lug leh dacwadan, taas oo lagu xalliyay Heshiiskan, oo lagu sii daayay Heshiiskan.

# HELITAANKA MACLUUMAAD DHEERAAD AH

## 25. Ma jiraan faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Heshiiska oo la heli karo?

Haa Ogeysiiskani wuxuu soo koobayaa Heshiiska la soo jeediyay. Faahfaahin dheeraad ah ayaa ku jirta Heshiiska iyo dukumeentiyada kale ee laga heli karo www.SeattleHADataIncident.com.

## 26. Sideen ku helaa macluumaad dheeraad ah?

Booqo Websaydka Heshiiska, www.SeattleHADataIncident.com, halkaas oo aad ka heli doonto macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan Foomka Dacwadda, nuqulka Heshiiska, jawaabaha su'aalaha ku saabsan Heshiiska iyo macluumaadka kale si ay kaaga caawiyaan inaad go'aansato inaad u qalanto lacag-bixin iyo in kale.

Maamulaha Heshiiska si lacag la'aan ah ugala xiriir 1-844-405-6502 ama warqad ugu dir:

SHA Data Settlement
P.O. Box 1068
Baton Rouge, LA 70821

**FADLAN HA HA LA XIRIIRIN MAXKAMADDA, XAFIISKA KARAANIGA MAXKAMADDA, AMA EEDEYSANAHA SI AAD WAX UGA WAYDIISO HESHIISKAN AMA HANNAANKA DACWADDA.**